# GO'AANKII 1325 EE GOLAHA AMMAANKA

*Translation: Shukria Dini and Abdirahman Dini Osoble*

Golaha Amaanka ee Qaramada Mudoobay waxa uu sharciyeey Go’aankii 1325 bisha October 31, 2001. Go’aankaas (S/RES/1325) waxa uu yahay Go’aankii ugu horeeyay ay Golaha Ammaaka ee Qaramada Mudoobay ay ku aqoonsatay dhibaatooyinka dagaalada ay si gaar ah u saameeyaan dumarka , iyo kaalinta weyn ee ay dumarka ka cayaaraan xalinta dagaaladaas iyo nabada.

Golaha Amaanka,

Markuu xusay Go'aannadiisii kala ahaa 1261 (1999) ee 25 Agoosto 1999, 1265 (1999) ee 17 Sebtember 1999, 1296 (2000) ee 19 Abriil 2000 iyo 1314 (2000) ee 11 Agoosto 2000, iyo War-Saxaafadeedyadii kasoo baxay Xafiiska Guddoomiyaha Golaha, iyo markuu xusay War-Saxaafadeedkii isla Guddoomiyaha ee ku beegnayd munaasabadda Maalinta Qaramada Midoobay ay ugu magac dareen Maalinta Xuquuqda Haweenka iyo Nabadda Adduunka ee ku aaddanayd 8da Maarso 2000 (SC/6816),

Isla markaasna markuu xusay ballanqaadyadii ku jiray Baaqii iyo Barnaamij-Hawleedkii lagu gaaray magaalada Bekiin (A/52/231) iyo go'aannadii kasoo baxay Fadhigii 23aad ee gaarka ahaa ee Golaha Guud ee Qaramada Midoobay ee uu hal-ku-dheggiisu ahaa "Haweenka 2000 : Sinnaanta Ragga iyo Haweenka, Horumar iyo Nabad la gaaro Qarniga 21aadka" (A/s-23/10/Res.1), gaar ahaan kuwii ku saabsanaa Haweenka iyo dagaallada hubaysan,

Isagoo tixgelinaya ujeedooyinka iyo mabaadii'da ku xusan Cahdiga Qaramada Midoobay iyo mas'uuliyadda asaasiga ah ee Golaha Ammaanka ee ku xusan qaybta ku saabsan dhowrista nabadda iyo ammaanka caalamka,

Muujinayana walwalkiisa in inta badan bulshada rayadka ah , gaar ahaan haweenka iyo carruurta, ay tahay midda waxyeellada ugu badan ay kasoo gaaraan dagaallada hubaysan, waxyeelladaasi oo sababa qaxootinimo iyo bara-kac, iyo isagoo aqoonsan culayska ay arrimahan kor ku xusan ku yeelan karaan taabbogalka nabad waarta iyo dib-u-heshisiin,

Isagoo aqoonsan kaalinta muhimka ah oo ay haweenka kaga jiraan ka-hortagga iyo xallinta dagaallada hubaysan iyo abaabulka nabadda, wuxuuna isla markaana Goluhu adkeynayaa ahmiyadda ay leedahay ka-qaybgalkooda iyo kaalintooda wax-ku-oolka ah ee kaga aaddan dhammaan tallaabooyinka loo qaado dhowrista iyo horumarinta nabadda iyo ammaanka, iyo baahida loo qabo in la kordhiyo kaalintooda xagga awood-go'aaneedkooda (decision-making) ku saabsan ka-hortagga iyo xallinta dagaallada,

Isla markaana aqoonsan baahida loo qabo in si buuxda loo fuliyo sharciga caalamiga ah ee ku salaysan xuquuqul-insaanka iyo kan aadanaha, kasoo daafacaya xuquuqda haweenka iyo gabdhaha inta ay socdaan dagaallada iyo markay istaagaanba,

Isagoo adkaynaya baahida in dhammaan qaybaha ay khusayso suurtogeliyaan in miina-bixinta iyo barnaamijyada wacyi-gelinta khatarta miinooyinka ay si gaar ah u tixgeliyaan baahida haweenka iyo gabdhaha,

Isagoo aqoonsan baahida deg-degga ah ee loo qabo in aragtida haweenka (gender perspective) ay ka muuqato hawlgallada nabad-ilaalinta ku lug leh, sidaa darteedna uu Goluhu xusayo Baaqii Windhoek iyo Qorshe-Hawleedkii Namibia ee farayey in aragtida haweenka ay ka muuqato hawlaha lagu xoojinayo nabad-ilaalinta (S/2000/693),

Isla markaasna aqoonsan ahmiyadda talada kusoo baxday War-saxaafadeedkii u soo saaray Guddoomiyehiisa taariikhdu markay ahayd 8da Maarso 2000, oo ahayd in dhammaan cidda ka qayb -galaysa hawlgallada nabad-ilaalinta la siiyo tababar gaar ahaaneed ee ku saabsan magan-gelinta, baahida gaarka ah iyo xuquuqul-insaanka haweenka iyo caruurta marka lagu jiro xaalado dagaal,

Isagoo aqoonsan in ogaanshaha raadka dagaallada hubaysan ay ku yeelan karaan haweenka iyo gabdhaha iyo taabbagelinta shuruuc adag oo dammaanad qaadaya badbaadadooda iyo kaalin buuxda inay ka qaataan geedi-socodka nabadda waxay wax weyn ku biirin karaan ilaalinta iyo horumarinta nabadda iyo ammaanka caalaamka,

Isagoo xusaya baahida loo qabo in la uruuriyo macluumaadka ku saabsan raadka ay dagaallada hubaysan ku yeelan karaan haweenka iyo gabdhaha,

1. **Wuxuu ku boorinayaa** dalalka xubnaha ka ah Qaramada Midoobay ka-dhabaynta kordhinta tirada wakiillada haweenka ee ku jira hay'adaha sar-sare ee go'aan qaadashada leh, ha noqdeen kuwa heer qaran, kuwa goboleed ama kuwa caalamiga ah, iyo kuwa ku lugta leh ka-hortagga, maaraynta iyo xallinta dagaallada;

2. **Wuxuu ku dhiirri-gelinayaa** Xoghaya Guud ee Qaramada Midoobay fulinta Qorshe-hawleedkiisii istrattejiyadeed (A/49/587), kasoo ku baaqaya kordhinta ka-qaybgalka haweenka heerarka kala duwan ee hay'adaha go'aan qaadashada leh xagga xallinya mushkiladaha dagaallada iyo geedi-socodka nabadda;

3. **Wuxuu ku boorrinayaa** Xoghaya Guud magacaabista wakiillo gaar ah iyo ergooyin haweeneed oo iyagoo ku hadlaya magaciisa ugu kala dab-qaada dhinacyada dagaallamaya, wuxuuna isla markaasi ka codsanayaa dalalka xubnaha ah inay soo gaarsiiyaan Xoghaya Guud musharraxiintooda oo ka mid noqon doona liis si joogta ah loo cusboonaysiiyo;

4. **Wuxuu kaloo** uu Xoghaya Guud ku boorrinayaa inuu ballaariyo kaalinta iyo wax-qabadka haweenka xagga hawlgallada Qaramada Midoobay ee ka wadaan dalalka dibedda, gaar ahaan ka mid-noqoshadooda goob-joogayaasha militari, kuwa Boliiska iyo hawlwadeennada u xilsaaran u kuur-gelidda arrimaha ku saabsan ilaalinta xuquuqul-insaanka iyo kan aadanaha;

5. **Wuxuu caddaynayaa** inuu diyaar u yahay in aragtida haweenku ay ka mid noqoto hawlaha ilaalinya nabadda, wuxuuna Xoghaya Guud ku boorrinayaa inuu sidaasi ka dhabeeyo oo meeshii ku habboon hawlgallada dibedda kaalinta haweenka ay ka muuqato;

6. **Wuxuu ka codsanayaa** Xoghayaha Guud inuu u gudbiyo dalalka xubnaha ah qaab iyo qalab tababareed ee ku saabsan difaaca haweenka, xuquuqdooda iyo baahida u gaarka ah, iyo ahmiyadda ay leedahay ka-qaybgelinta haweenka dhammaan tillaabooyinka ku wajahan ilaalinta iyo horumarinta nabadda, wuxuuna ku boorrinayaa dalalka xubnaha ah inay arrimaha kor ku xusan iyo tababarrada wacyi-gelinta ku saabsan cudurka dilaaga ah ee HIV/AIDS ku biiriyaan barnaamijyadooda tababarrada heer qaran oo ay ugu talogaleen ciidamadooda qalabka sida, ha ahaadeen militari ama Boolis, kuwaasoo loo diyaariyey inay qayb ka qaataan hawlgallada dibedda, wuxuuna isla markaasi ka codsanayaa Xoghaya Guud inuu sugo in shaqaalaha rayadka ah oo ka mid noqon doonaa isla hawlgalladdaasi iyagana la siiyo tababarro noocaasi ah;

7. **Wuxuu ku borrinayaa** dalalka xubnaha ah in wixii awoodooda ah, ha noqoto xag maaliyad, farsamo ama xag saad, ay ka qaybqaataan dadaallada ku saabsan samaynta tababarrada noocaasi ah oo ay ka mid yihiin kuwa ay sameeyaan hay'adaha, sida Sanduuqa Qaramada Midoobay u qaabilsan Haweenka, kan Caruurta (UNICEF), Qaxootiga (UNHCR) iyo hay'adaha kale ee u dhigma;

8. **Wuxuu ugu baaqayaa** dhammaan dhinacyada is-haya in markay ka-wada xaajonayaan nabadda iyo markay heshiis nabadeed garaanba intuba ayan marnaba ka tegin aragtiga haweenka, gaar ahaan arrimaha ku saabsan : a) baahida gaar ahaaneed ee haaweenka iyo gabdhaha marka ay timaado hawlaha dib-u-celinta qaxootiga, dib-u-dejintooda, dhaqan-celintooda iyo ka-qaybgalka dib-u-dhiska dalalkooda; b) tillaabooyinka lagu taageerayo hindisayaasha nabadaynta ee kasoo baxa haweenka iyo dhaqanka soo-jireenka ah ee dadka ee ku saabsan nabadaynta, isla markaasna u oggolaanaya haweenka inay qayb ka qaataan dhammaan heerarka fulinta heshiisyada nabadda; c) tillaabooyinka daafacaya isla markaana xushmaynaya xuquuqul-insaanka haweenka iyo gabdhaha, gaar ahaan kuwa khuseya dastuurka, habka wax loo doorto, Booliska iyo garsoorka;

9. **Wuxuu ugu baaqayaa** dhinacyada uu dagaalku ka dhex holcayo inay si buuxda u xurmayeen sharciga caalamiga ah, qaybahiisa khuseeya xuquuqul-insaanka haweenka iyo gabdhaha, isla markaasna u aqoonsan inay yihiin dad rayid ah, sida Heshiisyadii Geneva ee 1949 iyo qodobadii lagu kordhiyey 1977, Heshiiskii Qaxootiga ee 1951 iyo kii lagu kaabay 1967, Heshiiskii Tirtiridda dhammaan noocyada midab-takoorka lagu hayo Haweenka 1979 iyo kii ka dambeeyey ee 1999 iyo Heshiiskii Qaramada Midobay ee ku saabsanaa Xuquuqda Caruurta ee 1989 iyo labadii Heshiis ee ka dambeeyey ee 25 Mey 2000, iyo isagoo tixgelinaya qodobada ka khuseya arrintan Sharcigii Rome ee labu abaabulay Maxkamadda Caalamiga ah ee Dembiyada laga galo bani-aadamka;

10. **Wuxuu ugu baaqayaa** dhinacyada dagaallamaya inay qaadaan tillaabooyin lagaga difaacayo haweenka iyo gabdhaha dhibaatooyinka uga imanaya ahaanshahooda dheddig, gaar ahaan kufsiga iyo xadgudubyada kala duwan, iyo dhammaan dhibaatooyinka kale oo ay keenaan dagaallada hubaysan;

11. **Wuxuu ku adkeynayaa** dhammaan dalalka oo idil inay ka waantoobaan caadada ah inaan dembiilayaasha aan lagu qaadin waxay geysteen, wuxuuna isla markaana ku adkeynayaa in cid allale cidii gasha dembiyada xasuuq, kuwa ka dhanka ah beni-aadamka, kuwa dagaal oo ay ka midka yihiin kuwa loo geysto haweenka iyo gabdhaha , sida kufsiga, maxkammad la soo taago, wuxuu Goluhu farayaa in dembiyada kor ku xusan ayan marnaba gelin cafis;

12. **Wuxuu ugu yeerayaa** dhammaan dhinacyada dagaalamaya inay xurmeeyaan xeryaha iyo deegaannada la dejiyey dadka qaxootiga ah, iyagoo ka fiirinaya xagga bani-aadaninimmada iyo tixgelintooda inay yihiin goobo rayad ah, waa inay isla markaana tixgeliyaan baahida u gaarka ah haweenka iyo gabdhaha, isagoo xusaya go'aankiisii 1208 (1998) ee 19 Nofembar 1998;

13. **Wuxuu ku dhiirrigelinayaa** kuwa ku hawllan qorshaha hub-ka-dhigista, kala-diridda ciidamada iyo dhaqan-celintooda xagga bulshada inay tixgeliyaan baahida kala duwan ee dagaalyahaniinta, ha ahaadeen rag ama haweene, iyo baahida kuwa ku hoos nool;

14.**Wuxuu ballanqaadayaa** in mar kasta oo la qaado tillaabooyin ku salaysan Qodobka 41aad ee Axdiga Qaramada Midoway uu tixgelin siin doono cawaaqibka ay ku yeelan karaan dadka rayadka ah, gaar ahaan baahida u gaarka ah haweenka iyo gabdhaha, si loogu fidiyo tashiilaad bani-aadamnimo;

15. **Wuxuu caddaynayaa** inuu diyaar u yahay in wufuudda Golaha Ammaanka markay booqanayaan dibedda ay u laab furnaan doonaan arrimaha ku saabsan aragtida haweenka iyo xuquuqdooda, kalana tashan doonaan arrimahaas oo idil ururrada haweenka meelaha ay booqanayaan iyo kuwaa caalamiga ah;

16. **Wuxuu ugu yeerayaa** Xoghayaha Guud inuu diyaariyo daraasad ee uu u kuurgalayo raadka ay dagaallada hubaysan ku reebi karaan haweenka iyo gabdhaha, kaalinta haweenka kaga aaddan xagga nabadaynta iyo aragtida haweenka xagga gedi-socodka nabadda iyo xallinta dagaallada, wuxuuna isla Xoghayaha Guud ku boorrinayaa inuu soo hordhigo Golaha Ammaanka warbixin ku saabsan daraasadaas iyada ah, isla warbixintaasina loo soo gudbiyo dhammaan xubnaha Qaramada Midoobay;

17. **Wuxuu ka codsanayaa** Xoghayaha Guud in hadba kolka ugu habboon uu kusoo daro warbixinnadiisa ee uuu u soo gudbiyo Golaha Ammanka wixii horumar ah ee laga gaaro aragtida haweenka ee xagga hawlgallada nabadaynta iyo dhammaan arrin kasta ee khuseeya haweenka iyo gabdhaha;

18. **Wuxuu go'aansaday** inuu arrimaha haweenka si joogta ah u la socdo.